## مفهوم الشهادة

## Shahiidnimada waxa laga wado

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah kaasoo oo kitaabkiisa kariimka ah ku yiri:

**(وَالشُّهَدَاءُ عِنْدَ رَبِّهِمْ لَهُمْ أَجْرُهُمْ وَنُورُهُمْ)**

**(Shuhadaduna Eebe agtiisa ajri iyo nuur bay ku leeyihiin)**

Waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago, waxaan qirayaa sayidkeena iyo nabigeena Muxamed inuu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa, Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa iyo qofkii wanaag ku raacay ilaa maalinta abaalmarinta.

**Intaas kaddib:**

Alle waxaa u sugan addoomo uu doortay shashiinimana ku gaaryeelay, wuxuu leeyahay Alle:

**{وَلِيَعْلَمَ اللَّهُ الَّذِينَ آمَنُوا وَيَتَّخِذَ مِنْكُمْ شُهَدَاءَ}**

(**Iyo in Eebe muujiyo kuwa rumeeyay kana yeesho xaggiinna marag**).

Qiimaha ay leedahay shahiidnimada ayay macnayaaheeda u bateen, waa shuhado; maxaayeelay Alle subxaanahu wa tacaalaa iyo malaa'igtiisa

(nabadgelyo korkooda ha haatee) waxay u qireen janno, maxaayeelay sidoo kale waa kuwa nool oo lagu arsaaqo rabbigooda agtiisa, waxay markhaati ka yihiin wixii Alle u diyaariyay oo nimco ah, waxay markhaati ka yihiin yabooha Alle inuu run yahay, iyo macneyaal kale oo u kordhinaya sharaf iyo sarreyn, oona caddeynaya heerka shuhadada ay ka joogaan Alle agtiisa, wuxuu leeyahay Alle:

**{وَالَّذِينَ قُتِلُوا فِي سَبِيلِ اللَّهِ فَلَنْ يُضِلَّ أَعْمَالَهُمْ * سَيَهْدِيهِمْ وَيُصْلِحُ بَالَهُمْ * وَيُدْخِلُهُمُ الْجَنَّةَ عَرَّفَهَا لَهُمْ}**

(**Kuwa Jidka Eebe lagu dilana camalkooda Eebe ma halleeyo * Eebana wuu toosin oo hanuunin kuwaas, wuuna wanaajinn xaalkooda * wuxuuna galin Janno (uu baray) u caddeeyay**).

Wax kaga dhow ma jiro rajada naxariista Alle qof oo naftiisa u huray dalkiisa oona difaacay oona u dhintay wuxuu gaarayaa darajada shahiidnimada, waa ganacsi aan baarin, wuxuu leeyahay Alle subxaanahu:

**{إِنَّ اللّهَ اشْتَرَى مِنَ الْمُؤْمِنِينَ أَنفُسَهُمْ وَأَمْوَالَهُم بِأَنَّ لَهُمُ الجَنَّةَ}**

(**Alle wuxuu kaga gatay mu'miniinta naftooda iyo xoolahooda inay janno u ahaato**).

Darajada shahiidnimada waxay ka mid tahay darajooyinka ugu sarsarreeya Alle agtiisa.

Shahiidnimada dar Alle waa qaybo waxaa ugu sarreeya uguna weyn darajo ahaan: shahaadada ka hortagga cadowga, iyadoo wadanaka la difaacayo oona

la raadinayo raalliga Alle, wuxuu leeyahay rasuulka- naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee -:

**(لَيْسَ شَيءٌ أَحَبَّ إِلى اللَّه تعالى من قَطْرَتَين ، وأَثَرَيْنِ ؛ قَطْرَةُ دُمُوعٍ من خَشيَةِ اللَّه ، وَقَطرَةُ دَمٍ تُهرَاقُ في سَبِيلِ اللَّه تعالى ، وأما الأثران ؛ فأثر في سبيل الله تعالى ، وَأَثَرٌ في فَرِيضَةٍ منْ فَرَائِضِ اللَّه تعالى)**

(**Ma jiro wax Alle loogu jecel badan yahay labo dhibcood iyo labo raad; dhibic illin cabsi Alle dartii u timaada, dhibic dhiig oo jidka Alle lagu daadiyo, labada raadna waa raad jid Alle ku sugan midka kalana ku sugan yahay waajib ka mid ah waajibyada Alle**).

Waxaa jira noocyo kale oo shahaadada ka mid ah oo aan ka yarayn iyada: qofkasoo ku shahiiday difaaca dalkiisa ama wax ka mid khayraadkiisa ama asoo ka shaqeynaya sarreysiintiisa sida nabadsugaha oo ilaalinaya masaajida kaasoo ilaalinaya dadka dalxiisa oo dalkeena soo gala, midka ilaalinaya turaaska oo ku shahiidaya ikhlaaskiisa dartii iyo siduu ugu dadaalayo gudashada waajibkiisa sida la rabay, wax kastoo sidaas ah waa dar Alle, sida shaqaalaha oo ku dadaalaya ilaalinta hantida guud oo sidaas ku shahiidaya.

Sidoo kale qof la dilay asoo difaacaya naftiisa ama qof kale ama sharaftiisa ama sharafta qof kale ama hantidiisa ama hantida qofka kale waa shahiid, wuxuu

leeyahay rasuulka - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee -:

(منْ قُتِل دُونَ مالِهِ فهُو شَهيدٌ ، ومنْ قُتلَ دُونَ دمِهِ فهُو شهيدٌ، وَمَنْ قُتِل دُونَ دِينِهِ فَهو شهيدٌ ، ومنْ قُتِل دُونَ أَهْلِهِ فهُو شهيدٌ)

(**Qofkii la dilo hantidiisa ka soke waa shahiid, qofkii la dilo dhiiggiisa ka soke waa shahiid, qofkii la dilo diintiisa ka soke waa shahiid, qofkii la dilo ehelkiisa ka soke waa shahiid**).

Kuwan oo dhan waxay ilaalinayaan dalkooda iyo hantida iyo nafta iyo sharafta oo uu islaamka reebay in lagu xadgudbo oo uu amray in la ilaaliyo oona la difaaco, wuxuu leeyahay rasuulka- naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee -:

(كُلُّ الْمُسْلِمِ عَلَى الْمُسْلِمِ حَرَامٌ ؛ دَمُهُ ، وَمَالُهُ ، وَعِرْضُهُ)

(**Muslinka muslinka kale xaaraan buu ka yahay dhiiggiisa iyo hantidiisa iyo sharaftiisa**).

Maxaayeelay shahaadada waa deeq Ilaahay siinayo kan ugu sharaf badan khalqigiisa anbiyada iyo rususha kaddib, waxayna ku sugan yihiin meelaha ugu fiican maalinta qiyaame, miraha shahaadada waxaa ka mid ah:

Dadka shuhadada ma dareemaan geerida iyo dhibkeeda, wuxuu leeyahay rasuulka:

(مَا يَجِدُ الشَّهِيدُ مِنْ مَسِّ القَتْلِ إِلَّا كَمَا يَجِدُ أَحَدُكُمْ مِنْ مَسِّ القَرْصَةِ)

(**Waxa uu ka dareemayo shahiidka taabashada dilka ma aha waxan ahayn midkiina waxa uu ka dareemayo taabashada qanjaruufashada**).

Waxayna ka badbaadaan cadaabka qabriga iyo fidnadiisa nin ayaa yiri: rasuulkii Allow maxaa jiro oo mu'miniinta loogu fidneeyo qubuurahooda shahiidka mooyee? wuxuu yiri:

(كَفَى بِبَارِقَةِ السُّيُوفِ عَلَى رَأْسِهِ فِتْنَةً)

(**Waxaa ku filan fidno iftiinka seefaha madaxiisa ku dhacaya**).

Camalkooda suubanna ma go'o waligii, wuxuu leeyahay rasuulka - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee -:

(كُلُّ مَيِّتٍ يُخْتَمُ عَلَى عَمَلِهِ إِلاَّ الَّذِي مَاتَ مُرَابِطًا فِي سَبِيلِ اللهِ ، فَإِنَّهُ يُنْمَى لَهُ عَمَلُهُ إِلَى يَوْمِ القِيَامَةِ ، وَيَأْمَنُ مِنْ فِتْنَةِ القَبْرِ)

(**Meyd kaste camalkiisa waa la khatimayaa kan dhintay asoo heegan dar Alle ugu jiro mooyee, waxaa loo kobcinayaa camalkiisa ilaa maalinta qiyaame, wuxuuna ka nabadgalayaa fidnada qabriga**).

Waxayna leeyihiin abaal weyn iyo siismo fiican, shahiidka waxaa loo dhaafayaa dhiigga ugu horreeya

markuu ka daato, waxaa la tusaa meesha uu jannada ka fariisanayo, waxaana laga korinayaa cadaabka qabriga wuxuuna ka badbaadayaa argagaxa ugu weyn.

Sidoo kale shahiidka waxaa lasoo saarayaa maalinta qiyaame asoo sharaf leh oo miski ka carfaya, wuxuu leeyahay nabiga:

**(وَالَّذِي نَفْسِي بِيَدِهِ لاَ يُكْلَمُ أَحَدٌ فِي سَبِيلِ اللهِ – وَاللَّهُ أَعْلَمُ بِمَنْ يُكْلَمُ فِي سَبِيلِهِ– إِلاَّ جَاءَ يَوْمَ الْقِيَامَةِ وَاللَّوْنُ لَوْنُ الدَّمِ وَالرِّيحُ رِيحُ الْمِسْكِ)**

(**Waxaan ku dhaartay Allaha naftayda ay gacantiisa ku jirto qof laguma dhaawaco jidka Alle – Alle ayaa og qofka lagu dhaawacayo jidkiisa – hadday dhacdo wuxuu imaanayaa maalinta qiyaame midabka asoo ah midab dhiig urkana ur miski**).

**Waxaan oranayaa oraahdayda oo tan ah, Ilaahay ayaan dambidhaaf u weydiinayaa nafteyda iyo idinka**

***

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah, naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa ha ahaato oo ah kan lagu khatimay anbiyada iyo rususha sayidkeena Muxamed iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa iyo kuwa raacay.

**Walaalaha islaamka ahow:**

Shuhadadeena baariga ah waxay ku waarayaan xusuusta umadda iyagoo tusaale u ah huritaanka iyo raganimada iyo sharafta iyo kudayashada, Alle wuxuu doonay inuu siiyo nolosha dhabta ah oo joogtada ah oo aan lahayn wax la mid ah, wuxuu leeyahay Alle:

**{وَلَا تَحْسَبَنَّ الَّذِينَ قُتِلُوا فِي سَبِيلِ اللَّهِ أَمْوَاتًا بَلْ أَحْيَاءٌ عِنْدَ رَبِّهِمْ يُرْزَقُونَ*فَرِحِينَ بِمَا آتَاهُمُ اللَّهُ مِنْ فَضْلِهِ وَيَسْتَبْشِرُونَ بِالَّذِينَ لَمْ يَلْحَقُوا بِهِمْ مِنْ خَلْفِهِمْ أَلَّا خَوْفٌ عَلَيْهِمْ وَلَا هُمْ يَحْزَنُونَ * يَسْتَبْشِرُونَ بِنِعْمَةٍ مِنَ اللَّهِ وَفَضْلٍ وَأَنَّ اللَّهَ لَا يُضِيعُ أَجْرَ الْمُؤْمِنِينَ}**

(**Hana u malaynina kuwa lagu dilay jidka Alle kuwa dhintay, saas ma aha waxay ku noolyihiin rabbigooda agtiisa laguna arzaaqi * Iyagoo ku faraxsan wuxuu siiyay Alle oo fadligiisa ah, kuna bishaaraysan kuwaan wali haleelin ee gadaashooda ah inuusan korkooda cabsi iyo murugo midna «ahyn»**), wuxuu leeyahay rasuulka:

**(أَرْوَاحُهُمْ فِي جَوْفِ طَيْرٍ خُضْرٍ ، لَهَا قَنَادِيلُ مُعَلَّقَةٌ بِالْعَرْشِ ، تَسْرَحُ مِنَ الْجَنَّةِ حَيْثُ شَاءَتْ ، ثُمَّ تَأْوِي إِلَى تِلْكَ الْقَنَادِيلِ ، فَاطَّلَعَ إِلَيْهِمْ رَبُّهُمُ اطِّلَاعَةً ، فَقَالَ : هَلْ تَشْتَهُونَ شَيْئًا؟ قَالُوا : أَيَّ شَيْءٍ نَشْتَهِي**

**وَنَحْنُ نَسْرَحُ مِنَ الْجَنَّةِ حَيْثُ شِئْنَا ، فَفَعَلَ ذَلِكَ بِهِمْ ثَلَاثَ مَرَّاتٍ ، فَلَمَّا رَأَوْا أَنَّهُمْ لَنْ يُتْرَكُوا مِنْ أَنْ يُسْأَلُوا ، قَالُوا : يَا رَبِّ ، نُرِيدُ أَنْ تَرُدَّ أَرْوَاحَنَا فِي أَجْسَادِنَا حَتَّى نُقْتَلَ فِي سَبِيلِكَ مَرَّةً أُخْرَى ، فَلَمَّا رَأَى أَنْ لَيْسَ لَهُمْ حَاجَةٌ تُرِكُوا)**

(**Ruuxooda wuxuu ku sugan yahay shinbiro cagaaran calooshooda, waxay leeyihiin feynuusyo carshiga suran, jannada ayay kasoo daaqayaan meesha ay rabaan, kaddib feynuusyadaas ayay usoo hooyanayaan, rabbigooda ayaa fiiriyay wuxuu yiri: wax ma rabtaan? waxay dhaheen: maxaan rabnaa oo jannada ayaaba meel kaste aan ka daaqaynaaye, seddex jeer ayuu ku sameeyay arrinkaas markay arkeeen inaan la dhaafeynin waxay dhaheen: rabbiyow waxaan rabnaa inaad noogu soo celiso nafteena jirkeena ilaa la noo dilo dartaada mar kale, markuu arkay dan kale inaysan lahayn waa layska dhaafay**).

Qofkii Alle si dhab iyo daacadnimo u weyddiiyo shahaadada wuxuu gaarsiinayaa darajadeeda, wuxuu leeyahay nabigeena:

**(مَنْ سَأَلَ اللَّهَ الشَّهَادَةَ بِصِدْقٍ بَلَّغَهُ اللَّهُ مَنَازِلَ الشُّهَدَاءِ ، وَإِنْ مَاتَ عَلَى فِرَاشِهِ)**

(**Qofkii Alle shahaado si dhab ah u weyddiista wuxuu gaarsiinayaa darajada shuhadada xataa hadduu ku dhinto gogoshiisa**).

Qofkii hamigiisa yahay inuu difaaco diintiisa iyo dalkiisa oona ilaaliya hantida dalkiisa oo sidaas lagu dilo waa shahiid.

Tahniyad ayaa u sugan qofkii Ilaahay u doortay shahiidnimada kuna karaameeyay inuu la jiro anbiyada iyo siddiiqiinta iyo saalixiita, waana la jirid midda ugu fiican, wuxuu leeyahay Alle:

**{وَمَنْ يُطِعِ اللَّهَ وَالرَّسُولَ فَأُولَئِكَ مَعَ الَّذِينَ أَنْعَمَ اللَّهُ عَلَيْهِمْ مِنَ النَّبِيِّينَ وَالصِّدِّيقِينَ وَالشُّهَدَاءِ وَالصَّالِحِينَ وَحَسُنَ أُولَئِكَ رَفِيقًا}**

(**Qofkii adeeca Alle iyo rasuulka kuwaasu waxay ahaan la jirka kuwuu u nimceeyay Alle, oo nabiyada, rumeeyayaasha, shuhadada iyo kuwa suubban waxaana u fiican rafiiq kuwaas**).

**Ilaahayow u naxariiso shuhadadeena masarteenana noo ilaali iyo dhmaan dalalka caalamka**